



Tixraac: SSC/WM/XW/XN004/2024

Taariikh: Noofeembar 1, 2024

XEER-NIDAAMIYAHA DOORKA CIIDANKA ILAALADA WADDOOYINKA EE

CASHUURAHA GAADIIDKA.,

Isagoo fulinaaya mid ka mid ah ujeeddooyinka lagu sheegay Qodobka 2(4) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Guud, Xeer Lr. 1/2023, ee la xiriiira dabagalka dakhliga;

Isagoo u hoggaansamaya mabda'a lagu sheegay Qodobka 3 (7) ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud, Xeer Lr. 1/2023, oo tilmaamaya in dhammaan dakhliga ka soo baxa ilaha lacagta caddaanka ah ee Dawladda & hay'adaheeda lagu shubo halka xisaab ee "Khasnadda Mideysan", laguna ilaaliyaa lacagtaas iyada oo la raacayo maareyn hufan oo waxku'ool ah;

Isagoo gudanaya awoodaha lagu siiyey Qodobka 9(1) ; ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Guud, Xeer Lr. 1/2023, ee tilmaamaya in Wasiirku soo saari karo xeerhoosadyo, tilmaamayaal iyo hagayaal ka farcama xeerka Maamulka Maaliyadda Guud.

Isagoo gudanaya awoodaha lagu siiyey Qodobka 88(1) ee Xeerka Cashuuraha Berriga, Xeer Lr. 2/2023, ee tilmaamaya inuu soo saarayo Xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqangel& sharciyada dakhliga;

Markuu arkay Xeerka Cashuuraha Berriga, Xeer Lr. 2/2023, & Xeerka Tacrifadda Cashuuraha Berriga;

Wasiirka Maaliyadda wuxuu soo saaray Xeer-nidaamiyaha: **Xeernidaamiyaha Doorka Ciidanka Ilaalada Waddooyinka ee Cashuuraha Gaadiidka.**

Qodobka 1aad:

Magaca Xeernidaamiyaha

1. Xeernidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa “Xeernidaamiyaha Dooraka Ciidanka Ilaalada Waddooyinka ee Cashuuraha Gaadiidka.”

Qodobka 2aad:

Ujeedada Xeernidaamiyaha

1. Ujeedada xeerkan waa in lagu qeexo masuuliyadda, habraacyada, iyo wada shaqeynta Booliiska Taraafikada ee la xiriirta fulinta iyo dabagalka canshuuraha gaadiidka, sida:
 - a. In xaqiijiyo dooraka Ciidanka Ilaalada Waddooyinka (Taraafikada) ee fulinta ururinta cashuuraha la xiriira gaadiidka.
 - b. In la hirgeliyo, la xoojiyo, korna loo qaado cashuuraha la xidhiidha gaadka sida: canshuurta isdiiwaangelinta gaadiidka, canshuurta isticmaalka waddooyinka, liisanka wadidda gaadiidka, ganaaxyada ka dhasha jebinta xeerarka maaliyadeed.
 - c. In dejiyo hannaan wada-shaqeyn leh oo u dhexeeya Wasaaradda Maaliyadda iyo Ciidanka Ilaalada Waddooyinka.
 - d. In kordhiyo daahfurnaanta, isla xisaabtanka iyo waxtarka ururinta cashuuraha gaadiidka.

Qodobka 3aad:

Awoodda Sharciyeed ee Xeernidaamiyahan

1. Xeerkan wuxuu ku saleysan yahay:
 - a. Xeerka Cashuuraha Berriga ee Dowladda SSC-Khaatumo
 - b. Xeernidaamiyaha Cashuurta Gaadiidka ee Dowladda SSC-Khaatumo
 - c. Shuruucda Dawlad Goboleedka SSC-Khaatumo

Qodobka 4aad:

Baaxadda Xeernidaamiyahan

1. Xeernidaamiyahan waxaa lagu dhaqayaa:
 - a. Dhamaan Ciidanka Ilaalada Waddooyinka ee fulinaya sharciga waddooyinka.
 - b. Dadweynaha isticmaala gaadiidka la diiwaan geliyey.
 - c. Hay'adaha dawladda ee la shaqeeya arrimaha canshuuraha iyo gaadiidka.

Qodobka 5aad:

Doorka Booliiska Taraafikada ee Canshuur Ururinta

1. Ciidanka Ilaalada Waddooyinka waxay la shaqeynayaan Wasaaradda Maaliyadda si ay u xaqiijiyaan in gaadiidka adeegsada waddooyinka xadka Dowladda SSC-Khaatumo ay bixiyeen cashuurtii ku waajibtay, waxayna yeelanayaan doorkan:
 - a. Inay hubiyaan caddeynta bixinta canshuuraha iyo rukhsadaha gaadiidka inta lagu jiro joojinaha waddooyinka.
 - b. Inay la socdaan una gudbiyaan Wasaaradda Maaliyadda gaadiidka aan bixin canshuurta.
 - c. Inay caawiyaan hay'adaha maaliyadda marka laga hor istaagayo ama la qabto gaadiid aan sharciga waafaqsanayn.
 - d. Inay fuliyaan ganaaxyada ay soo saarto hay'adda canshuuraha.

Qodobka 6aad:

Baadhitaanka iyo Kormeerka Waddooyinka

1. Ciidanku waxay fulin karaan baaritaan waddooyinka ah si loo xaqiijiyo u hoggaansanaanta xeerarka iyo xeernidaamiyeyaasha cashuuraha gaadiidka.
2. Gaadiidka aan bixin cashuuraha ku waajibay waa in la joojiyo, loo gudbiyo hay'adaha dakhliga Dowladda.

Qodobka 7aad:

Wada-shaqeynta Maaliyadda iyo Taraafikada

1. Wasaaradda Maaliyaddu waa inay siiso Ciidanka Ilaalada Waddooyinka xeerarka, habraacyada, siyaasadaha iyo xogta canshuuraha gaadiidka.
2. Ciidanku waa inay soo gudbiyaan warbixino bille ah oo la xidhiidhta wax ka qabashada gaadiidka aan canshuurta bixin.
3. Guddiyo iskaashi oo wadajir ah ayaa la dhisi karaa marka loo baahdo howlgal ballaadhan.

Qodobka 8aad:

Adeegsiga Nidaamyada Danabaysan (Digital)

1. Ciidanku waa inay adeegsadaan qalab danabaysa (tusaale: taleefan casri ah ama qalab gacanta lagu qaato) si loo hubiyo xogta gaadiidka;

2. Wasaaradda Maaliyaddu waa inay xaqiijiso in nidaamka xogta uu yahay mid waqtiga-dhabta ah shaqeeya.

Qodobka 9aad:

Ganaaxa Gaadiidka Aan Diiwaangashanayn

1. Gaadiid aan bixinin cashuurtii ku waajibtay waxaa lagu ganaaxayaa 30% cashuurtii laga rabay.

Qodobka 10aad:

Kormeer iyo La xisaabtan

1. Ciidanka waxaa saaran waajib ah in ay soo gudbiyaan warbixin bille ah oo la xiriirta: tirada gaadiid la joojiyay, ganaaxyada la saaray, iyo cashuuraha la ururiyey.
2. Wasaaradda Maaliyaddu waxay xaq u leedahay inay samayso kormeer joogto ah si loo xaqiijiyo isla xisaabtanka iyo hufnaanta fulinta.

Qodobka 11aad:

Tababar iyo Wacyigelin

1. Wasaaradda Maaliyadda iyo Hoggaanka Ciidanka Ilaalada Waddooyinku waxay iska kaashan doonaan tababar siinta ciidanka iyo wacyigelinta bulshada ee ku saabsan waajibaadka cashuuraha gaadiidka.

Qodobka 12aad

Ururinta Ajuurooyinka iyo Khidmaddaha

1. Ajuuradda iyo Khidmadda waxaa uruurinaya shaqaalaha/saraakiisha Wasaaradda Maaliyada ee loo idmay ee ku sugan Waaxda Cashuuraha Berriga, Wasaaradda Hawlaha Guud iyo degmooyinka.
2. Dhammaan shaqsiyaadka bixinaya ajurooyinka iyo khidmaddaha waxaa la farayaa in ay ku shubaan lacagahaas akoonada Wasaaradda Maaliyaddu u cayintey dakhliga ajurooyinka iyo cashuuraha gaadiidka.

Qodobka 13aad

Akoonada Lacag Qabashada

3. Ddhammaan dakhliga cashuuraha waa in loo tixgaliyaa dakhliga guud ee Dowladda SSC-Khaatumo, waana in lagu shubaa Khasnada Mideysan.

4. Xeer-nidaamiyahan wuxuu waajibinayaa in lacagta dawladda lagu qaban karo keliya akoon dawladeeda oo ka diiwangashan Wasaaradda Maaliyadda.
5. Xeer-nidaamiyahan wuxuu reebayaa in dakhli dawladda iyo lacagta cashuurta lagu qabto akoon shakhsi ah oo gaar loo leeyahay.
6. Sarkaalka ay dhex marto lacag iyo dakhli dawladdu leedahay waxaa lagu ganaaxayaa xaddiga lacagta martey mid le'eg.

Qodobka 14aad

Warbixinta Korjoogtenta Dhaqangalka Xeer-nidaamiyaha

1. Waaxda Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda waa inay korjoogteysaa u hoggaansanaanta Xeer-nidaamiyahaan iyo xeerarka laga dheegtey, oo ay soo saartaa warbixin bille ah, mid lix bilood ah oo ay la wadaageeyso Wasiirka Maaliyadda.

Qodobka 15aad

Wareegtooyin

1. Wasiirka Wasaaraddu wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro, wareegtooyin, hageyaal iyo tilmaamo lagu saxayo, laguna toosinayo Xeer-nidaamiyahan oo aan ka hor-imaanayn qodoboda xeerka Cashuuraha Berrig iyo Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 16aad:

Dhaqan-gal iyo La-socod

1. Xeer-nidaamiyahan wuxuu dhaqan galayaa laga bilaabo taariikhda uu soo saaro Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Dawladda SSC-Khaatumo.
2. Agaasinka Waaxda Dakhliga ayaa mas'uul ka noqon doona kormeerka fulinta Xeer-nidaamiyahan.

Cabdiqani Xuseen Xaaji Hiirad

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Dakhliga SSC Khaatumo

Saxeex: _____

